

## **AMARKA LAMB. 8**

### **MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOMALIYA**

#### **MAAMULAHA**

KADIB markii la arkay sharciga lamb. 12 ee 8 Febrayo 1950;

KADIB markii la arkay dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee taariikhdu 31 Maarso 1950;

KADIB markii la tixraacaya amarka lamb. 5 ee 12 Abriil 1950 oo khuseeya xerarka garsoorka ee laga hirgeliyey dalka;

IYADOO la tixgeliyey baahida loo qabo in la hirgeliyo nidaam maamul ee dalka Somalia oo ku meel gaarka oo hoos tagayaa maamulka Talyaaniga, sida ku carifan faqradda labaad ee qod. 23, ee Heshiiska Wakiilnimada oo ay aqbashay Guddoonka Maamulka Walaayada ee ka dhacay Gineefa, 27dii Janaayo 1950;

IYADOO la cuksaday awooda la siiyey waxaa la;

#### **WUXUU AMRAYAA:**

##### **Qod. 1**

Dalka Somaliya waxaa loo qeybiyey Gobollo sida kuwa hoos ku qoran:

- 1) Gobolka Mujurtiniya – magaala madax Bender Qassim;
- 2) Gobolka Mudug – magaala madax Beled Weyne;
- 3) Gobolka Banaadir – magaala madax Muqdisho;
- 4) Gobolka Jubbada Sare – magaala madax Isha Baydhabo;
- 5) Gobolka Jubbada Hoose – magaala madax Kismaayo;

##### **Qod. 2**

Gobolladaasi ku tixan qodobka sare ku xusan waxaay u kala qeysami doonaan degmooyinka soo socda;

- 1) Gobolka Mujurtiniya:
  - 1) Degmada Bender Qassim.
  - 2) Degmada Caluula.
  - 3) Degmada ISkushuban.
  - 4) Degmada Qardho.
- 2) Gobolka Mudug:
  - 1) Degmada Beled Weyne.
  - 2) Degmada Gaalkacyo.
  - 3) Degmada Ceel Buur.
  - 4) Degmada Dhusamareeb.
  - 5) Degmada Buulo Barde.
- 3) Gobolka Banaadir:
  - 1) Degmada Muqdisho.
  - 2) Degmada Afgooye.
  - 3) Degmada Jowhar (Villaggio Duca degli Abruzzi).
  - 4) Degmada Marka.
  - 5) Degmada Barawe.

- 4) Gobolka Jubada Sare.
  - 1) Degmada Baydhaba.
  - 2) Degmada Bur Hakaba.
  - 3) Degmada Xuddur.
  - 4) Degmada Luuq.
  - 5) Degmada Bardheere.
- 5) Gobolka Jubbada Hoose.
  - 1) Degmada Kismaayo.
  - 2) Degmada Jamaame (Margerita).

### **Qod. 3**

Ilaa iyo intii amarro cusub laga soo saarayo, Guddomiyeyaasha Gobolladas iyo kuwa degmooyinka waxay ku shaqeyn doonaan sida ku qoran Madax 4aad ee O.P.A.M oo lagu ansixiyey R.D. no 2708 ee 12 Nofember 1937 oo la taba galaayo nidaamka sharciyeed ee Dalka.

### **Qod. 4**

Amarkaani wuxuu hirgeli doona kadib markii lagu soo bandhigo Faafinta Rasmiga ah wuxuu ka bilaaban doona 1da Abril 1950.

Muqdisho, 12 Abril 1950.

**MAMULAHA GUUD**  
**Fornari**